WASHINGTON EARLY ACHIEVERS
PREPARING CHILDREN FOR SUCCESS IN SCHOOL

Foomka Racfaanka Darajeynta Early Achievers

Magaca Xarunta:	**Magaca Lala-xariiraha Early Achievers:**
Taariikhda Siidaynta Darajeynta:	**Taariikhda Dalabka Racfaanka Darajeynta:**
Qodobada xarunta Early Achievers ee Wakhtigan:	**Heerka Darajeynta Early Achievers ee Wakhtigan:**
Qodobada Xarunta Early Achievers ee Lagu Taliyay (qodobada lagu taliyay in la kordhiyo waxay keenayaan in uu kordho Heerka Early Achievers):	**Heerka Early Achievers ee Darajeynta ee Lagu Taliyay** (waa inuu ka duwanaadaa Heerka wakhtigan si racfaan ahaan loogu eego):
Magaca Isku-duwaha Gobolka/Grantee/Qandaraaslaha:	**Taariikhda aad kala xariirtay Isku-duwaha Gobolka/Grantee/Qandaraaslaha tabashada darajeynta**:
Sababta Racfaanka Darajeynta (Ka sheekee):	

Fadlan waraaqaha soo socda ee shardiga ah raaci racfaankaaga:

1. Liiska dhammaan qaybaha Heerka Tayada ee qiimaynta lagu samaynayo iyo sharaxaad sida xaruntaadu u buuxisay qayb kasta wakhtiga la qiimaynayo goobtaada shaqo, kaas oo lagu buuxin karo bogga xiga. Haddii meel dheeraad ah loo baahdo, waxaad bog ugu dari kartaa qaabka hoos lagu sheegay:

   Heerka Laga Hadlayo: Tani waa luuqadda qaybta heerka goonida ah ee laga hadlayo. Qoraalku waa in uu ka yimaadaa Qalabka U-diyaarsanida Darajeynta Isdhexgalka.
   Qoraalka Xarunta: Kani waa sharax siday xaruntaadu u buuxisay heerka qiimaynta sare wakhtigii qiimaynta goobta shaqada.

2. Nuqul dhammaystiran oo Xogururinta Booqashada Kadib ee Jaamacadda Washington (UW). Haddii loo isticmaalay xogururinta tabashooyinka kusaabsan booqashooyinka ururinta xogta, fadlan ku soo dar taariikhdii aad kala xariirtay UW xogururinta iyo sharaxaadda wixii ficil la socosha ah oo ay qaadeen UW.

3. Wax caddaymo ama waraaqo ah oo lagu sharaxay tixraacaaga

Fadlan ka eeg su'aalaha badanaa la iswaydiiyo (FAQ) ee halkaan ku lifaaqan tilmaamaha ku saabsan warbixinada *aan* racfaanka laga qaadan karin, hawsha DCYF ee dib u eegidda iyo xallinta racfaanada darajeynta. Ogsoonow dhammaanba adeegyada Early Achievers oo ay ku jiraan tababarada iyo Shahaadooyinka Hagaajinta Tayada waa la xayiri doonaa muddada hawsha racfaanada darajayntu socoto.

Saxiixa Xariiriyaha Koowaad ee QRIS

Fadlan u soo dir waraaqdaan iyo dhammaanba dokumentiga la socda: qris@dcyf.wa.gov.

Haddii aad doonayso, waxaad ku soo diri karta foomka racfaanka iyo dokumentiga taageeraya boostada. Racfaanada boostada lagu soo dirayo waa in lagu soo dira boostada shahaaadada leh iyadoo uu kaqaybgaluhu bixinayo wixii kharash ah cinwaankaan soo-socda:

Department of Children, Youth, and Families
Attn: QRIS Support Services
P.O. Box 40970
Olympia, WA 98504-0970

Heerka Laga Hadlayo: Halkan riix si aad qoraalka ugu qorto. **Qoraalka Xarunta**: Halkan riix si aad qoraalka ugu qorto.
Heerka Laga Hadlayo: Halkan riix si aad qoraalka ugu qorto. **Qoraalka Xarunta**: Halkan riix si aad qoraalka ugu qorto.
Heerka Laga Hadlayo: Halkan riix si aad qoraalka ugu qorto. **Qoraalka Xarunta**: Halkan riix si aad qoraalka ugu qorto.
Heerka Laga Hadlayo: Halkan riix si aad qoraalka ugu qorto. **Qoraalka Xarunta**: Halkan riix si aad qoraalka ugu qorto.

WASHINGTON EARLY ACHIEVERS
PREPARING CHILDREN FOR SUCCESS IN SCHOOL

Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo ee Racfaanka Darajeynta Early Achievers

1. **Yaa u qalma inuu racfaan ka qaato darajeynta isagoo isticmaalaya hawsha Racfaanka Darajeynta Early Achievers?**

   Hannaanka Racfaanada Darajeynta Early Achievers wuxuu quseeyaa kaqaybqaatayaasha Early Achievers ee kaqaybqaatay qiimaynta goobta shaqada ee helay darajeynta xarunta. Xarumuhu waxay ka shaqayn karaan helitaanka hal racfaan darajayn wareeggii darajeynta Early Achievers oo kasta.
   Cidda lagala xariirayo Early Achievers waxay doonan kartaa racfaanka darajeynta 30 maalmood gudahood marka lasoo saaro:

   - Tabashooyinka kusaabsan qalad xagga farsamada xisaabta dhibcaha
   - Dacwaddu tahay in shaqada xaruntu qabatay waqtigii qiimaynta goobta ay ahayd inay ku helaan ugu yaraan hal darajo oo kor ah (tusaale ahaan, ka yimaadeen Heerka 3 oo ay heleen Heerka 4) iyadoo lagu salaynayo Heerarka Tayada Early Achievers

   Racfaanada waxaa la oggolaanaya kaliya xaaladaha rafcaanka guulaystaa ay keenayso in kor loo qaado darajeynta ugu yaraan hal darajo.

2. **Sideen U Dalban Karaa Darajeyntayda?**

   Cidda lagala xariirayo Early Achievers waa inay marka hore la socodsiisaa wixii tabasho ah Isku-duwaha Gobolka/Grantee/Qandaraaslaha, kaas oo qiimayn doona Heerka Tayada Early Achievers si loo caddeeyo sida darajeyntayda loo xisaabinayo guud ahaan taas oo ku salaysan Heerka Tayada, kaas oo baajin kara baahida loo qabo racfaanka darajeynta.
   Haddii xaruntu weli qabto walaacyo, Lala-xariiraha Early Achievers ayaa soo dhammaystiri doona foomka Darajeynta Rafcaanka Early Achievers oo ku lifaaqi macluumaad qoran oo faahfaahsan ee ay ku jiraan:
   - Sharraxaada sababta ku-camalfalka xarunta ee xilliga qiimaynta ay u heli lahayd ugu yaraan hal heer oo sarreeyo marka la eego Tayada Early Achievers Qaybaha Horumarinta (tusaale, ka bilaabanta Heerka 3 ilaa Heerka 4).
   - Dokumentiyada iyo Caddaynta ku-camalfalka xarunta u gaarka ah qaybta Heerka Tayada oo kasta oo qilaaf ka taagan yahay.
   - Taariikhaha xariirka lala yeeshay xariiryaha goboleed.
   - Nuqul ah xogururinta booqashada ka dambeeya oo dhammaystiran, haddii ay quseyso, taariikhaha xariirka lala sameeyey UW iyo natiijada jawaabcelinta xogururinta. Kaqaybqaatayaashu waxa laga yaabaa in ay ka codsadaan xogururintooda dhammaystiran Xariiriyaha Bulshada.

   Lala-xariiraha Early Achievers wuxuu u gudbin Foomka Racfaanka Darajeynta oo dhammaystiran iyo dokumentiyada caddaynaya Sanduuqa DCYF QRIS (qris@dcyf.wa.gov) ama boosta la xaqiijiyay, oo qarashka kaqaybqaataha uu qabayo, ugu diro ciwaanka soo socda:

   Department of Children, Youth, and Families
   Attention: QRIS Support Services
   PO Box 40970, Olympia, WA 98504-0970

Waa in foomka Darajeynta Early Achievers uu ku soo **gaadhaa** DCYF wakhti aan ka danbaynin 5:00 galabnimo wakhtiga Paasifigga, ee maalinta 30-aad ee marka darajeynta la baahiyay. DCYF ma ay aqbalayso mas'uuliyadda ay keenaan daahitaanka adeegyada keenitaanka boostada.

3. **Waa sidee haddii aan tabashooyin ka qabo booqashada qiimayntayda goobta?**

   Lala-xariiraha Early Achievers waa inuu qoraa dhammaanba waxyaabaha uu ka welwelayo ee Xogururinta Booqashda Kadib ee Jaamacadda Washington (UW) taasoo loogu soo diray xarumaha iimeyl ka dib booqashadii kama dambaysta ahayd ee xarunta. Koobi waraaq ah waxaa laga codsan karaa CL. Xogururinta waa in la soo buuxiyaa oo lagu soo diraa onlayn saddex maalin shaqo gudahood markii la helo xogururinta. Kooxda qiimaynta UW waxay tixgelin doonaan tabahsooyinka lagu sheegay xogururinta waxayna ula soo xariiri doonaan Lala-xariiriyaha Early Achievers si toos ah si ay ugala hadlaan wixii tabahsooyin ah, taasoo laga yaabo inay keento ama aanay keenin aruurin macluumaad dheeraada oo xarunta ah.

   Hawsha racfaanka darajayntu waxa uu quseeya Warbixintaada Darajeynta Early Achievers loogumana talogalin inuu xallliyo waxyaabaha ku saabsan booqashada aruurinta macluumaadka. Koobiga xogururinta oo la soo buuxiyay waa in lagu soo daro ka qayb ahaan foomka *Racfaanada Darajeyntu Early Achievers*, oo ay ku jiraan tafaasiisha ku saabsan wixii ah xogururinta la-socoshada UW. Waxaad ka codsan kartaa koobiga xogururinta oo dhammaystiran xafiiska guud ee UW CQEL.

4. **Waa sidee haddii aan hayo macluumaad dheeraad ah oo aan doonayo in kooxda qiimaynta UW tixgeliyaan?**

   Racfaanka darajeyntu ma aha dib-u-darajayn, mana eegi doono wax caddaymo cusub ah oo aan la soo bandhigin muddadii darajayntii hore. Xarumaha doonaya in dib-u-darajeyn lagu sameeyo si ay u keenaan caddaymo cusub ama doonaya inay muujiyaan habab cusub waa inay codsadaan dib-u-darajeyn. Fadlan kala xariir Isku-duwaha Gobolka/Grantee/Qandaraaslaha wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan dib-u-darajeynta.

5. **Waa sidee haddii aan racfaan ka qaato darajeyntayda, oo natiijada cusubi ay noqoto darajayn ka hoosaysa middii hore? Ma dooran karaa middii aan doono?**

   Maya. Haddii natiijada racfaanku noqoto dib-u-darajayn, dib-u-darajeynta ayaa noqon doonta darajeynta kama danbaysta ah.

6. **Macluumaad noocee ah ayaan ku jirin racfaanka darajeynta?**

   Waxyaabahaan soo socda ayaan laga qaadan karin racfaan:

   - Macluumaad dheeraad ah oo ay ururisay xarunta *kadib* booqashooyinka qiimaynta goobta shaqada.
   - Qaybaha xarunta ku astayso "*ka bixid*" *Qalabka U-diyaarsanaanta Darajeynta Ishdexgalka* ee dhammaystiran ee la siiyay hay'addooda hoggaanka goboleed.
   - Buundooyinka Is-qiimaynta ama CCQB way ka sarreeyeen buundooyinka qiimaynta rasmiga ah.

- Buundooyinka ERS iyo CLASS ee qiimaynaha la soo dhaafay waxay ka sarreeyeen buundooyinka qiimaynta Early Achievers.
- Taariikhda/wakhtiga booqashooyinka goobta shaqada haddii booqashooyinka ay dhaceen inta lagu jiray jadwalka waqtiga ay ku bixiyeen xarunta Codsigooda Qiimaynta Goobta Shaqada, oo ay ku jiraan: saacadaha/maalmaha shaqada xarunta; daaqadda qiimaynta ay xaruntu codsatay ee laba bilood; taariikhaha xidhnaanta ee xaruntu dooratay (afar). Booqashooyinka waxaa dib loogu muddeeyaa kaliya xaaladda gurmadka/masiibada dabiiciga ee xarunta.
- Doorashada fasalada ee kormeerada.
- Kala duwanaanshaha waqtiga lagu qaatay fasalada.
- Shaqaalaha caadiga ah ee aanan joogin inta lagu jiray booqashada.
- Fasalka ama daryeelka canugga guriga qoyska wuxuu lahaa carruur cusub, carruur jirran, ama haddii kale maalin “aan caadi ahayn”, oo ay ku jiraan kala-go'yada jadwalka joogtada ah.
- U dhicis hannaanka qiimaynta sida lagu tilmaamay Heshiiska Kaqaybqaadashada iyo Tilmaamaha Hawlgalka.
- Macluumaadka diyaar uma ahayn dib-u-eegidda xog-aruuriyayaasha xilliga booqashooyinka qiimaynta goobta shaqada.
- Ka muujiyaan tabashooyin ku saabsan qiimeeyayaasha, sida habdhaqan aanan ku habboonayn ama aan xirfadle ahayn ama qilaafka la dareemay ee danaha u dhexeeyo xog-aruuriyayaasha iyo xarunta. Arimahaan waa in la gudbiyaa xogururinta booqashada kadib, si markaas DCYF ay u maarayn karto wixii arrimo taagan ka hor inta darajeyntu aysan dhammaanin.
- Aagga Koboca Xirfadda iyo Heerka Tayada Tababarka (Shahaadooyinka Shaqaalaha). Tabashooyinka ku saabsan xaqiijinta waxbarashada shaqaalaha waa in laga racfaan qaataa iyada oo la isticmaalayo hannaanka jira ee MERIT ka hor qiimaynta goobta shaqada si loo darajeeyo.

7. **Maxaa dhaca inta aan sugayo racfaanka darajeyntayda?**

   Muddada hawsha racfaanka darajeyntu socoto, dhammaanba adeegyada Early Achievers, oo ay ku jiraan hagitaanka iyo Abaalmarinaha Hagaajinta Tayada, waa la xayiri doonaa. Xaruntaadu waxay u qalmi doontaa adeegyada kadib markii la gaaro go’aanka kama danbaysta ee darajeynta racfaanada.

8. **Waa maxay hawsha si loo xalliyo racfaanka darajeynta?**

   Maamulaha QRIS wuxuu eegi Foomka Racfaanka Darajeynta xarunta Early Achievers waxaana laga yaabaa inuu codsado dokumentiyo dheeraad ah ee ka socda xarunta ama saaxiibada, oo ay ku jiraan kooxda qiimaynta UW iyo xariiriyaha goboleed ee xarunta.
   Maamulaha QRIS ayaa ku qaadan go'aan hore 10 maalin-shaqo gudahood oo ka bilaabanayso helitaanka dhammaan dokumentiyada iyo macluumaadka muhiimka ah si uu u qaato go'aan.
   Ogaysiinta qoran ee go'aanka waxaa loo diri xarunta.
   Haddii Racfaanka Darajeynta la oggolaado:

- Haddii lagu go'aansado in qalad la sameeyay xisaabinta, buundooyinka waa la saxi xaruntana waxaa la siin Warbixinta Darajeynta oo la beddelay. Xaaladda iyo/ama darajeynta kaqaybqaadashada xarunta waxa lagu cusbooneysiin Hubinta Daryeelka Carruurta DCYF waxaana si furan u tixraaci doona Child Care Aware of Washington, goortii ay ku habboon tahay.
- Xaaladda natiijada racfaanku u baahdo dib-u-darajeyn, DCYF waxay la xariiri kooxda qiimaynta UW si ay u bilawdo qiimaynta goobta shaqada si dib ay u darajeyso. Fadlan ogow: Xaaladda dib-u-darajeynta ay sabab u tahay racfaanka darajeynta la bilaabay, ma jiraan dokumentiyo ama caddayn xarun oo aan la helin inta lagu jiray booqashooyinka goobta shaqada ee hore oo dib loo eegayo.

Haddii racfaanka la diido:

- Xarunta waxa lagu soo wargelin si qoraal ah go'aanka oo ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan sababta racfaanka loo diiday. Darajeynta xaruntu waxay shaqayn muddo saddex sanadood ah oo ka bilaabanta taariikhda darajeynta la sameeyay.

Haddii ay xaruntu kasoo horjeedsado go'aanka:

- Lala-xariiraha Early Achievers waa in uu ku jawaabaa qoraal ahaan ha noqoto iimeyl ama boosta la xaqiijiyay 10 maalin-shaqo gudahood laga bilaabo taariikhda go'aanka DCYF. Waraaqaha ay hesho DCYF kadib 5:00 galabnimo (PST) ee maalinta 10aad kadib go'aanka racfaanka lama tixgelinayo. DCYF ma qaaddo wax masuuliyad ah oo ah daahitaanada ay sababtay adeegga gaarsiinta boostada.
- Maamulka QRIS wuxuu soo koobi racfaanka xarunta iyo go'aanka koowaad ee DCYF wuxuuna u soo gudbin Caawiyaha Agaasimaha DCYF ee Ku-camalfalka Tayada iyo Korriinka Xirfadle si loo eego 10 maalin-shaqo gudahood.
- DCYF waxay ku ogaysiin xarunta go'aanka ugu dambeeyo qoraal ahaan.

Fadlan ogsoonow: ***Si loo ilaaliyo waxqabadka daacadnimada hawsha racfaanada darajeynta oo loo hubiyo in dhammaanba macluumaadka xarunta si buuxda loo tixgeliyo, dhammaanba wada xariirka Waaxda Waxbarashada Hore ee quseeya xarun khaas ah racfaankeeda darajeynta waa in loola dhaqmaa habka racfaanada darajeynta ee kor lagu soo sheegay. DCYF ma eegayso wax dalab ah oo aan raacin nidaamka iyo shuruucda sare ee la ansixiyay.***